

29.07.2023

**Wargeyska iyo Xisaab Xidhka
January 1st to June 1st. 2023**

Qodobada Warbixinta

Saamileyda sharfta mudan ee shirkadda Boodhari Mills, wageyskani waa macluumaadki lixdii bilood ee aynu soo dhaafnay. Warbixintu waxay halkan ku xusi doontaa qodobada hoos ku taxan:

- i. Faaiidada ama Khasaaraha Shirkadda 2023
- ii. Xalaada Dhaqaale ee shirkadda
- iii. Saamileyda iyo Saamiga
- iv. Hiigsiga iyo Aragtida Dheer 2024

1.0 Faaiido Iyo Khasaare

Bishii todobaad, July oo hada ina dhaaftay waxa socday xisaab xidhka Shirkadda iyo ansixinta xisaabta. Kuna saabsan howlgalka ganacsiga shirkadda lixdii bilood anynu soo dhaafnay sanadkan 2023.

Xisaab xidhka shirkaddu waxa uu muujiyay in-aanay shirkadu faaiido helin. Laguna kabay lacag dhan \$140 000 (boqol iyo afartan kun oo doolar) si ay u shaqayso una dhamaystirto qabadinka daynta ah. Yadoo bangi uu daymiyay shirkadda si ay u soo iibsato qabadiin una soo celiso raasamaalka iyo 8% fee oo uu saartay bangigu. Warqadan waxa la socda qayb xisaabaada si ra'yi aad uga heshaan guud ahaan.

2.0 Xaalada Dhaqaale ee Shirkadda

Shirkaddu waa inay kordhiso raasamaal hawleedka, heshana ugu yaraan \$1 million dollars oo maalgalina si ay u yarayso daymaha bangiyada ay ka qaadato una badbaadiso faaiidada shirkadda. Gudiga iyaa ka fadhiisan doona sidii shirkaddu 1 million dollars ay usoo heli lahayd oo ay ku yarayso daynta lagu soo iibiyo qabadinka. Yadoo keenaysa inay shirkadu kabitaan dhaqaale oo danbe ay ka maaranto, saamileydana lacag faaiidaa loogu soo celin karo.

3.0 Saamileyda iyo Saamigooda

Saamileyda Shirkaddu aad bay ugu mudan yihiin saami iibsiga iyo maalgalinta shirkadda. Dhowr qof iyaa email soo diray oo maleeyey shirkaddu inay maalgashigoodii meel dhigtay oo ay lasoo laaban karaan markay doonaan. Waynu fahmi karnaa in dadka qaardkood duruufo soo maraan. All ha udhibyareeyo farajna ha ufuro.

Sida aynu wada ognahay warshaduhu uma shaqeeyaan sida xawaaladaha ama hagbadaha oo ah lacag meel taal goorwalba. Dhamaan maalkii anyu wada soo maalgashanay waxay galeen dhismaha shirkadda, qalabaynta warshada iyo wixii la xidhiidha.

Haday Xubin saamileeya duruufo dhaqaale ku yimaadaan rabanna inuu saamiga iibiyo, way ka iibin karaan qof kale oo saami doona oo ay is heleen.

4.0 Hiigsiga Shirkadda iyo Argatida Dheer 2024

Saamileydu waa baalasha ay ku duushu Boodhari Mills. Xaalad kastoo inaga hortimidna waynu ka baxnay. Taasi waxay muujinaysaa inay wada shaqaynta ka dhaxaysa maamulka iyo saamileydu mid sugan tahay. Maamulkuna ku

dadaalayaan faaiido gaadhka ganacsigeena. Waynu cusubnahay runtii marka loo eego wakthiga anynu suuqa ku jirnay iyo shirkaddaha dalka ka jira.

Sidoo kale waxa dhaxmaray Shirkadda Boodhari Mills iyo Shirkadda Daqiiqda National Flour Mills kuna taala Berbera wada hadal is fahama. Si la isaga kaashado duruufaha taagan xaga cuntada siiba qabadinka didbada aynu ka keeno. Taasi waa guul waxaanay muujinaysaa umada Soomaalidii inay ka midaysantahay daryeelka dadka iyo dalka, taasoo ku ladhan dariiqa faaiida doonka ganacsiga.

Allaa Mahad Leh,

Board of Directors
Boodhari Mills | Boodhari Venture Group
www.boodharimills.com
Hargeysa, Somaliland
+252 63 339 1288



Profit or Loss Statement - 2023
BOODHARI MILLS

DESCRIPTION	Jan 2023	Feb 2023	Mar 2023	Apr 2023	May 2023	Jun 2023	Total
Gross Profit	-\$10,400	-\$3,500	-\$5,235	-\$780	\$20,815	\$11,600	\$12,500
Expenses							
Car repair	\$52	\$0	\$0	\$0	\$19	\$0	\$71
Cashurta shaqalaha	\$287	\$287	\$0	\$574	\$0	\$0	\$1,148
Diesel	\$232	\$199	\$0	\$205	\$0	\$220	\$856
Electricity	\$4,344	\$8,109	\$3,870	\$12,010	\$5,315	\$5,793	\$39,441
Factory maintenance	\$0	\$1,400	\$0	\$0	\$0	\$8,000	\$9,400
Factory parts	\$0	\$0	\$0	\$0	\$918	\$2,321	\$3,239
Fumigation	\$0	\$0	\$0	\$0	\$1,255	\$0	\$1,255
Internet	\$27	\$0	\$0	\$0	\$0	\$0	\$27
Land tax	\$351	\$487	\$0	\$0	\$0	\$0	\$838
Travel Expenses	\$0	\$0	\$0	\$0	\$2,400	\$800	\$3,200
Mobile phone	\$0	\$136	\$7	\$7	\$7	\$7	\$164
Factory parts expenses	\$10,034	\$4,341	\$1,369	\$6,651	\$2,956	\$7,684	\$33,035
Payroll	\$4,923	\$4,884	\$5,200	\$5,200	\$5,134	\$5,831	\$31,172
Tax	\$0	\$0	\$0	\$0	\$287	\$2,212	\$2,499
TV advertisement	\$2,000	\$0	\$0	\$0	\$300	\$600	\$2,900
Water	\$120	\$114	\$0	\$136	\$126	\$199	\$694
Total Expenses	\$22,370	\$19,957	\$10,446	\$24,783	\$18,717	\$33,666	\$129,939
Profit before Loan Bank Fees	-\$32,770	-\$23,457	-\$15,681	-\$25,563	\$2,099	-\$22,066	-\$117,439
Islamic Financing (Cost)	\$3,873	\$3,873	\$3,873	\$3,873	\$3,873	\$3,873	\$23,240
Depreciation (Ommitted)	\$0	\$0	\$0	\$0	\$0	\$0	\$0
Net Profit (Loss)	-\$36,644	-\$27,330	-\$19,554	-\$29,436	-\$1,775	-\$25,940	-\$140,679

